# الإسلام عمل وسلوك
# نماذج من حياة التابعين

## Islaamka waa camal iyo dhaqan
## Tusaalooyin ka mid ah nolosha taabiciinta

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, kaasoo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

{وَالَّذِينَ جَاءُوا مِنْ بَعْدِهِمْ يَقُولُونَ رَبَّنَا اغْفِرْ لَنَا وَلِإِخْوَانِنَا الَّذِينَ سَبَقُونَا بِالْإِيمَانِ وَلَا تَجْعَلْ فِي قُلُوبِنَا غِلًّا لِلَّذِينَ آمَنُوا رَبَّنَا إِنَّكَ رَءُوفٌ رَحِيمٌ}

**(Kuwa yimid asxaabta Nabiga kadib waxay oranayaan rabbiyow noo dhaaf annaga iyo walaalaheena iimaanka nagaga hormaray hana u galinin qalbigeena xiqdi kuwa rumeeyay rabbiyow waxaad tahay dhimriye oo naxariiste ah)**

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Intaas kaddib:**

Ilaahay wuxuu ka doortaa addoomihiisa qof diintiisa iyo risaaladiisa u shaqeynaya daacadna u ah, wuxuu sheegay nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - inay yihiin dadka ugu khayr badan asxaabtiisa kaddib taabiciinta iyo kuwa iyaga raacay, waxaa laga wariyay ibnu mascuud -Ilaahay raalli haka noqdee - inuu yiri: rasuulka ilaahay wuxuu yiri:

**خَيْرُ النَّاسِ قَرْنِي ، ثُمَّ الَّذِينَ يَلُونَهُمْ ، ثُمَّ الَّذِينَ يَلُونَهُمْ ... )**

(**Dadka waxaa ugu khayr badan qarnigayga, kaddib kuwa ku xiga, kaddib kuwa ku xiga…**)

Kuwan waa kuwa la doortay oo lagu tilmaamay khayr, waxayna xambaareen amaanada cilmiga, waxay ka difaacaan taxriifka xadgudbeyaasha iyo beenta kuwa baadilka wata iyo fasirka jaahiliinta, Ilaahay wuu amaanay wuxuu la jamciyay asxaabta rasuulka, wuxuuna ku tilmaamay wanaajin -Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuuna u ballanqaaday jannooyin ay webiyaal hoos ay marayaan, wuxuu yiri Alle:

(وَالسَّابِقُونَ الأَوَّلُونَ مِنَ الْمُهَاجِرِينَ وَالأَنصَارِ وَالَّذِينَ اتَّبَعُوهُم بِإِحْسَانٍ رَّضِيَ اللَّه عَنْهُمْ وَرَضُواْ عَنْهُ وَأَعَدَّ لَهُمْ جَنَّاتٍ تَجْرِي تَحْتَهَا الأَنْهَارُ خَالِدِينَ فِيهَا أَبَدًا ذَلِكَ الْفَوْزُ الْعَظِيمُ)

**(Kuwii ku dheereeyay «khayrka» ee horreeyay oo ka mid ah muhaajiriinta iyo ansaarta iyo kuwii ku raacay wanaagga Allaa ka raalli noqday iyana way ka raalli noqdeen, wuxuuna u darbay jannooyin ay socoto dhexdooda wabiyadii iyagoo ku waari waligood, taasina waa liibaan wayn).**

Taabiciinta waa dadka ugu dhow waqti ahaan rasuulka Ilaahay, taabiciinta waa jiilka labaad ee jiilka asxaabta, taabiciinta dadka raacayna waa jiilka ku xiga jiilka taabiciinta (Ilaahay raalli haka noqdee) maxaa ka fiican oraahda Imaam Albuusiiri – Ilaahay ha u naxariistee -:

**وكلُّهُم مِنْ رسولِ اللهِ مُقْتَبِسٌ * غرفًا مِنَ البَحرِ أو رَشْفًا مِنَ الدِيَمِ**

(**Dhamaantooda waxay ka qaadanayaa rasuulka Alle. ka qaadashada badda ama ka dhuuqidda daruuraha**).

Taabiciinta waxay la saaxiibeen asxaabta waxbay ka barteen, asxaabtana waxay u qireen fadli iyo cilmi, waxaa ka mid ah shahaadada Ibnu Cumar -Ilaahay raalli haka noqdee - uu u qiray Saciid bin Almusayib – Ilaahay

ha u naxariistee - oraahdiisa: " isaga wallaahi wuxuu ka mid yahay muftiyaasha), wuxuu dhihi jiray" weyddiiya Saciid bin Almusayib maxaayeelay wuxuu la fariistay saalixiinta", Saciid bin Almusayib wuxuu fatwoonayay asxaabta iyagoo nool.

Cadaa bin Abii rabaax – Ilaahay ha u naxariistee - wuxuu u fariisan jiray Makka fatwo markuu dhintay kaddib Caalimka umadda Cadullaahi bin Cabbaas - Ilaahay raalli haka noqdee - markuu ibnu Cumar yimid Makka oo ay weyddiiyeen wuxuu yiri: (mas'alooyinka miyaad ii kulminaysaan reer makkow idinkoo uu idinku jiro inbu abii Rabaax?.

Taabiciinta waxaa lagu yaqaanaa jacaylkooda dhabta ah oo ay jeclaayeen rasuulka Ilaahay, wuxuu ahaa Xasan Albasri –Ilaahay ha u naxariistee - markuu sheego xadiiska salka geedka timirta iyo hilowga uu u hiloobay rasuulka wuu ooyn jiray wuxuu dhihi jiray: addoomihii Ilaahayow alwaaxa wuu tabay rasuulka Alle asoo xiiso u hayo idinka ayaa kaga habboon inaad u hilowdaan kulankiisa, Waxaa la weyddiiyay Imaam Maalik (Ilaahay ha u naxariistee): goormaad ka maqashay Ayuub Assikhtiyaani? wuxuu yiri: wuxuu xajiyay labo jeer waan ilaalin jiray mana ka maqli jirin, laakin wuxuu ahaa marka nabiga la sheego wuu ooyn jiray ilaa aan ugu naxariisto... Waxay ka gaareen weynaynta ay weynaynayeen nabiga heer xadiiskiisa aysan warinin

iyagoo ku sugan mooyee xaalad fiican iyo qaab qurux badan, dadka iyaga raacayna sidaas ayay ku barbaareen, Wuxuu yiri Abuu Salama alkhusaaciy: wuxuu ahaa Maalik bin Anas markuu rabo inuu haddiis akhriyo wuu weysaysan jiray weysadiisa salaadda wuxuu labisan jiray dharka kan ugu fiican, garkiisa ayuu shanlayn jiray, waxaa lagala hadlay arrinkaas wuxuu yiri: waxaan ku weyneeyaa xadiiska rasuulka Ilaahay.

Waxaa ka mid ahaa taabiciinta qof nabiga uu khayr ku sheegay sida Uweys Alqarni kaasoo baarri u ahaa hooyadiisa, nabiga wuxuu u sheegay asxaabtiisa wuxuu u sheegay inuu yahay qof ducadiisa la aqbalayo, waxaa laga wariyay Cumar bin Alkhaddaab -Ilaahay raalli haka noqdee - waxaa laga wariyay inuu yiri: waxaan maqlay rasuulka Ilaahay asoo oranaya:

**(إِنَّ خَيْرَ التَّابِعِينَ رَجُلٌ يُقَالُ لَهُ أُوَيْسٌ ، وَلَهُ وَالِدَةٌ، وَكَانَ بِهِ بَيَاضٌ ، فَمُرُوهُ فَلْيَسْتَغْفِرْ لَكُمْ)**

(**Waxaa ugu khayr badan taabiciinta nin la dhaho Uweys wuxuu leeyahay hooyo wuxuuna qabay baras, fara ha idin dambidhaaf weyddiiyo**), marka reer Yaman u yimaadeen Cumar bin Alkhaddaab wuu raadinayay wuxuu ku yiri: dambidhaaf ii weyddii wuxuu yiri: adigaa ku habbooon inaad dambidhaaf ii weyddiiso adiga waxaad tahay qof la saaxiibay rasuulka Alle kama harin ilaa uu dambidhaaf u weyddiiyo...

Taabiciinta waxay ka barteen asxaabta rasuulka Ilaahay fahanka diinta saxa ah, waa kanaa Imaam Alxasan Abasri wuu ka mid yahay, marka la weyddiiyay: Mu'min miyaad tahay adiga? wuxuu yiri: Imaanka waa labo haddii aad i weyddiinayso iimaanka Ilaahay iyo malaa'igtiisa iyo kutubtiisa iyo rusushiisa iyo jannada iyo soosaaridda iyo xisaabta mu'min ayaan ahay haddii aad i weydiinayso oraahda Alle:

{إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ الَّذِينَ إِذَا ذُكِرَ اللَّهُ وَجِلَتْ قُلُوبُهُمْ وَإِذَا تُلِيَتْ عَلَيْهِمْ آيَاتُهُ زَادَتْهُمْ إِيمَاناً وَعَلَى رَبِّهِمْ يَتَوَكَّلُونَ * الَّذِينَ يُقِيمُونَ الصَّلاةَ وَمِمَّا رَزَقْنَاهُمْ يُنْفِقُونَ * أُولَئِكَ هُمُ الْمُؤْمِنُونَ حَقّاً}

(**Mu'miniinta dhabta ah waa uun kuwa marka Alle la xuso ay cabsato quluubtoodu, marka lagu akhriyo korkooda aayaadka Allana ay Iimaan u kordhiso, rabbigoodana uun tala saarta * ee ah kuwa ooga salaadda waxaannu ku arsaaqnayna wax ka bixiya * kuwaasaana ah mu'miniinta xaqa ah**)

Wallaahi ma ogi inaan ka mid ahay iyo in kale.

Wuxuu yiri Albayhaqiy –Ilaahay ha u naxariistee -oo ka hadlaya: kama joogsanin Xasan asalka iimaankiisa ee wuxuu ka joogsaday dhammaystirnaantiisa oo Ilaahay ugu yaboohay mu'miniinta Jannada oraahdiisa:

{لَهُمْ دَرَجَاتٌ عِنْدَ رَبِّهِمْ وَمَغْفِرَةٌ وَرِزْقٌ كَرِيمٌ}

(**Waxayna mudan jannooyin rabbigooda agtiisa ah, iyo dambidhaaf iyo risqi sharaf leh**).

Sidoo kale waxay fahmeen fududeynta wayna ku dabbaqeen noloshooda, wuxuu leeyahay Sufyaan Athowry – Ilaahay ha u naxariistee -: "cilmiga agteena waa rukhso ka sugnaatay qof lagu kalsoon yahay, adkeyntase qof kaste ayaa sameyn kara", wuxuu yiri Al-azraq bin Al-qays – Ilaahay ha u naxariistee -: waxaan ku sugnayan webi jiinkiisa oo ku yaalla Al-ahwaaz oo biyaha ay ka gureen, waxaa yimid Abu barza Al-aslamiy - Ilaahay raalli haka noqdee - asoo faras saaran wuu tukaday faraskiisa ayuu daayay faraskii ayaa ka tagay isagana salaaddiisa ayuu ka tagay waa raacay ilaa uu ka haleelo waa soo qabtay kaddib waa yimid salaaddiisa ayuu dhammaystay waxaa nagu jiray qof ra'yi leh wuu yimid asoo dhahayo, fiiriya odeygan salaaddiisa ayuu ka tagay faras awgeed! wuu yimid wuxuu yiri: qof iguma adkeynin laga soo bilaabo markii rasuulka aan waayay, wuxuu yiri: gurigayga waa dheer yahay haddii aan tukado oo aan ka tago faraskayga ma u tagi karo ehelkayga ilaa habeenkii, wuxuu ka bartay taas rasuulka oo ahaa midka labo shay aan loo bandhigin hadday dhacdana wuxuu dooran jiray kan ugu fudud hadduusan ahayn dambi, waa midka oranaya:

**(يَسِّروا ، ولا تُعسّروا، وَبشِّروا ، ولا تُنفّروا)**

(**Fududeeya ha adkeynina, bishaareeya ha didinina**)

Iyo oraahdiisa:

(إِنَّ الرِّفْقَ لَا يَكُوْنُ فِي شَيْءٍ إِلَّا زَانَهُ ، وَلَا يُنْزَعُ مِنْ شَيْءٍ إِلَّا شَانَهُ)

(**Xasilloonida shay kuma sugnaato inay qurxiso mooyee lagamana siibo shay inay xumeyso mooyee**).

Sidoo kale waxay dabbaqeen naxariista iyo iskaashiga iyo in la dareemo dadka kale noloshooda si camali ayay u dabbaqeen, waa kanaa Cali bin Alxuseen – Ilaahay ha u naxariistee - si qarsoon ayuu ugu sadaqaysan jiray in badan ka mid ah dadka danta yar, qofna ma ogaan jirin markuu dhintay waxay waayeen qof iyaga biilo, markay dhaqeen waxay ka arkeen dhabarkiisa iyo garbihiisa raadka xamuulka jiraabka uu u qaadi jiray haweenka laga dhintay guryagooda iyo masaakiinta, waxaa la ogaaday inuu ahaa midkii habeenkii u keeni jiray, waxaa la yiri: wuxuu biili jiray kun reer oo ku nool Madiina.

kuma ekeen isu naxariisashada iyo iskaashiga muslimiinta kaliya, wuxuu gaaray muslimiinta iyo dadka aan muslinka ahayn, waa kanaa sayidkeena Cumar bin Cabdilaziiz – Ilaahay ha u naxariistee - wuxuu u qoray mas'uulka u joogay Basra asoo dhahayo: eeg xaggaaga dadka ahlu dimmaha qofkii weynaaday oo tabar beelay oo aan shaqyn karin kasii baytulmaalka msulimiinta wixii wax u taraya" wuxuu kaga dayanayaa arrinkas wixii kasoo arooray Sayidnaa Cumar ibn alkhaddaab markuu arkay nin duq ah oo ka mid ah ehlu kitaabka oo tuugsanaya wuxuu yiri: wallaali cadaalad uma falin

ninkan haddaan cunno dhalinyaranimadiisa oona aan dacayno duqnimadiisa kaddib wuxuu kasiiyay beytulmaalka wixii ku habboon, sidaas oo kale Sayidkeena Khaalid bin alwaliid -Ilaahay raalli haka noqdee - markuu sulxi la sameynayay ree Xiira: wuxuu jideeyay oday kaste shaqada ka gabooba ama aafo ay ku dhacdo ama ahaa qof hodan oo faqiirtoobay in laga biilayo beytulmaalka muslimiinta, dhamaantooda taas waxay kaga dayanayeen rasuulka Alle waxayna dabbaqayeen diinta saxa ah, wuxuu yiri Alle:

{لا ينهاكم اللَّهُ عَنِ الَّذِينَ لَمْ يُقَاتِلُوكُمْ فِي الدِّينِ وَلَمْ يُخْرِجُوكُمْ مِنْ دِيَارِكُمْ أَنْ تَبَرُّوهُمْ وَتُقْسِطُوا إِلَيْهِمْ إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُقْسِطِينَ}

(**Alle idinkama reebayo kuwa diinta aan idinkula dagaallamin guryiinana aan idin kasoo saarin inaad u sameysaan samafal oona aad u garsoortaan, maxaayeelay Alle waa jecel yahay kuwa garsooreyaasha**)

Naxariistaas kuma ekeen aadanaha kaliya, ee waxay gaartay xayawaanka iyo shinbirta iwm. wuxuu u qoray Cumar bin Cabdilcaziiz mas'uulka Masar u joogay: waxaa isoo gaaray in Masar laga helo awr wax lagu qaado, halka rati waxaa lagu raraa kun rodol, haddii uu kitaabkayga kusoo gaaro yaanan arkin rati lagu rarayo wax ka badan lix boqol rodol.

Sidoo kale wuxuu kula dardaarmay naxariis inaan dulleynin inaan la garaacin, wuxuu ka bartay arrinkaas rasuulka Alle markuu kula dardaarmay geeljiraha ratigiisa asoo leh:

**(أَفَلاَ تَتَّقِي اللهَ فِي هَذِهِ الْبَهِيمَةِ الَّتِي مَلَّكَكَ اللهُ إِيَّاهَا ، فَإِنَّهُ شَكَا إِلَيَّ أَنَّكَ تُجِيعُهُ ، وَتُدْئِبُهُ)**

(**Miyaadan Alle uga baqaynin xoolahan oo Ilaahay gacanta kuu galiyay wuxuu ii sheegtay inaad gaajo ku dilayso iyo inaad shaqo ku daaliso**)

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxamed uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Walaalaha islaamka ahow:**

Waxa ugu weyn oo taabiciinta ay gaar la yihiin waxaa ka mid ah, dabacsanaanta ay dadka kula dhaqmayaan iyo naxariisashadooda, waxay ahaayeen dadka kuwa ugu dabacsan markay la dhaqmayaan, waxaa laga wariyay Qataada - Ilaahay ha u naxariistee - wuxuu yiri: waxaan usoo galnay Xasan Albasri asoo hurdaya madaxiisa agtiisa waxaa taallay dambiil, waan soo jiidnay waxaa ku jiray muufo iyo faakiho waxaan bilownay inaan cunno wuu soo baraarugay wuu na arkay waa ku farxay wuu dhoollacaddeeyay asoo akhrinaya oraahda Alle:

{أَوْ صَدِيقِكُمْ لَيْسَ عَلَيْكُمْ جُنَاحٌ}

(**Ama saaxiibkiina wax dambi ah korkiina ma ahaanin**)

Waxaa laga wariyay Jariir bin Xaazim – Ilaahay ha u naxariistee - wuxuu yiri: waxaan joognay Xasan agtiisa iyadoo dharaarta ay bar noqotay, wuxuu yiri inankiisa: ka fududeeya odeyga waa dhibteenee waxna ma cunin waxna ma cabbin, wuxuu yiri iska daa ma jiro wax iiga farxad inaan iyaga arko.

Waxaa ku sugan arrinkan nafjeclaysiga in la inkiro iyo garashada qiimaha cilmiga iyo in la tixgaliyo iyo in la caddeeyo qadarka qiimaha diinta Alle ee ku sugan nafta, waxaa laga yaabaa taas inay u noqoto cashar qofka diinta dadka u bandhigaya asoon aqoon u lahayn wuu lumayaa wuuna luminaya, wuxuu leeyahay rasuulka:

**(إِنَّ اللَّهَ لَا يَقْبِضُ الْعِلْمَ انْتِزَاعًا يَنْتَزِعُهُ مِنْ الْعِبَادِ؛ وَلَكِنْ يَقْبِضُ الْعِلْمَ بِقَبْضِ الْعُلَمَاءِ ، حَتَّى إِذَا لَمْ يُبْقِ عَالِمًا ، اتَّخَذَ النَّاسُ رُءُوسًا جُهَّالًا ، فَسُئِلُوا ، فَأَفْتَوْا بِغَيْرِ عِلْمٍ ، فَضَلُّوا وَأَضَلُّوا)**

(**Ilaahay maqaado cilmiga asoo ka siibaya siibid addoomaha laakin wuxuu ku qaadayaa cilmiga**

**qaadidda culimada, markay dadka sameystaan madax jaahiliin ah waxbaa la weyddiinayaa si aqoon la'aan ayay ugu jawaabayaan way lumayaan wayna luminayaan**).

Taabiciinta waxay u ahaayeen kudayasho fiican dadka gadaashooda yimid, waa kanaa Imaam maalik bin Anas – Ilaahay ha u naxariistee - wuxuu ka mid yahay taabiciinta kuwa raacay wuxuu ka dalbaday Abuu Jacfar Almansuur kitaabkiisa in la cuskado "Almuwadda'" dhammaan dalalka islaamka asoo oranaya waxaan go'aansaday inaan amro kutubadaada kuwan oo aad qortay - wuxuu ka wadaa muwadda'a - inaad nuskhado ka sameyso markaas aan u diro dal kaste ka mid ah dalalka muslimiinta nuskho oona aan faro inay ku camalfalaan waxa ku sugan oona aysan ugu gudbin wax kale, oona ay iska daayaan wixii isaga kasoo haray ee aqoontan cusub, waxaan u arkay asalka cilmiga riwaayada reer Madiina iyo cilmigooda.

Wuxuu yiri Imaam Maalik amiir mu'miniinow ha sameynin arrinkan, dadka hadallo ayaa u hormaray waxayna maqleen axaadiis waxayna wariyeen

riwaayooyin, qof kaste wuxuu qaatay wixii ugu soo horeeyay weyna ku camalfaleen wayna ku dhaqmeen asoona ka mid ah kala duwanaanta dadka iwm. haddii laga soo reebo wixii ay qaateen waa ad'adkeyn iska daa dadka iyo wixii ay haystaanba, iyo wixii dad kaste ay naftooda u doortay wuxuu yiri: wallaahi haddii naftayda ay igu raaci lahayd arrinkaas waan fari lahaa.

Waxaa ka mid ah wanaagga tawaaduca iyo weynida fahanka fiqiga wixii ka sugnaaday Imaam Shaafici – Ilaahay raalli haka noqdee - markay ardaygiisa Yuunis bin Cabdil-aclaa ay is khilaafeen Yuunis wuu istaagay asoo xanaaqsan marka habeenkii la gaaray, Yuunis wuxuu maqlay albaabkiisa oo la garaacayo wuxuu yiri yaa albaabka taagan? wuxuu: yiri: Muxamed bin Idriis, wuxuu yiri Yuunis: qof kaste ayaan ku fikiray oo magaciisa la yiraahdo Muxamed bin Idriis qofaan ahayn Shaafici wuxuu yiri: markaan furay albaabka kedis ayay igu noqotay wuxuu yiri Shaafici Yuunisow boqolaal masaa'il ayaa na kulminaya hal mas'alo miyaa na kalageynayso?! Yuunisow, ha isku dayin inaad ku guuleysato khilaafyada oo dhan mararka qaarkooda

kasbashada quluubta ayaa ka fiican kasbashada mawaaqifta, Yuunisow ha duminin buundooyinkaad dhistay oo aad ka gudubtay waxaa laga yaabaa inaad maalin u baahato, waligaaga nac qaladka laakin ha nicin qofka qaldan qalbigaaga oo dhan ku nac macsida laakin masaamax una naxariiso caasiga, Yuunisow buri hadalka laakin tixgali qofka hadalka dhacay, muhimmadeena waa inaan ka takhalusno jirrada ee ma aha inaan ka takhalusno dadka jirran.

Ilaahay ha u naxariisto markuu yiri Shaafici:

**أُحِبُّ الصالِحينَ وَلَستُ مِنهُم * * * لَعَلّي أَن أَنالَ بِهِم شَفاعَه**

**وَأَكرَهُ مَن تِجارَتُهُ المَعاصي * * * وَلَو كُنّا سَواءً في البِضاعَه**

**Waxaan jeclahay dadka suuban anoon ka mid ahayn*****

**waxaan rajaynayaa inaan shafeeco ku helo**

**waxaan nacayaa kan shaqadiisu tahay macsi *****

**xataa haddaan ka mideysan nahay badeecada**

Sidaas ayay ku socdeen culimadeena sharafta badnaa waxayna noo ahaayeen kudayasho tan ugu

wanaagsan xambaaridda amaanada diinta Ilaahay iyo si fiican in loo fahmo iyo in lagu dhaqmo akhlaaqdiisa iyo si wanaagsan in dadka loo gaarsiiyo, si xigmad leh iyo wacdi suuban

**Ilaahayow naga dhig kuwa dhegeysanaya oraahda oona raacaya waxa ugu fiican, kuwaas waa kuwa Alle hanuuniyay waana kuwa caqliga leh.**